# Booqashooyinka Dhaqangelinta Hayadda Socdaalka ama "Hawlgallada": Sida ay u shaqeeyaan

Booqashooyinka sharci-fulinta hayadda socdaalku waxay dhici karaan ogeysiis la'aan. Kiisaska ugu caansan waxay ku lug leeyihiin baaritaannada dukumeentiyada sharciga. Xaaladaha qaarkood, saraakiisha imigareyshinka waxay raadinayaan caddayn ama waxay raadinayaan shakhsiyaad gaar ah. Isticmaal tilmaan-bixiyahaan si aad ugu diyaargarowdo oo aad u ogaato sida looga jawaabo booqashooyinka sharci-fulinta socdaalka.

## Dhaqangelinta socdaalka ee Waaxda Amniga Gudaha waxaa ka mid ah

- **Baaritaannada Amniga Gudaha (HSI)** waxay eegaan foomamka loo shaqeeyaha 'Foom I-9 (xaqiijinta u-qalmitaanka shaqada) iyo waraaqaha kale ee loo hoggaansamo.
- **Dhaqangelinta Socdaalka iyo Kastamada (ICE)** waxay sharci-fulisaa sharciga socdaalka waxayna xidhi kartaa oo tarxiili kartaa dadka aan u dhalan. Wakiilada ICE ma aha booliis, laakiin waxay qaadan karaan qoryo waxaana laga yaabaa inay xidhaan dhar ay ku qoran yihiin "Booliiska" ama "ERO" (Hawlgallada Dhaqangelinta iyo Saaridda).
- **Kastamyada iyo Ilaalinta Xuduudaha (CBP)** waxay joogaan xadka si ay go'aan uga gaadhaan cidda soo gali karta Maraykanka, waxayna isticmaali karaan wakiilada xuduudaha si ay u dejiyaan bar-koontarool ama wax su'aalaan dadka goob100 mayl u jira xuduud dhul ama badda.
- **Adeegyada Dhalashada iyo Socdaalka Mareykanka (USCIS)** waxay baari karaan kafaala-qaadka socdaalka ee shaqada la xiriirta waxayna booqan karaan goobaha shaqada.

## Kahor Booqasho kasta oo ICE ama Saraakiisha Socdaalka kale

- Hubi in Foomka I-9 iyo waraaqaha socdaalka ee kale ay dhamaystiran yihiin oo sax yihiin. Samee hubin ku saabsan foomka I-9 oo sax khaladaadka.
- U magacow qof ama waax (sida waaxyaha Shaqaalaha ama Sharciga) barta xiriirka ee saraakiisha socdaalka.
- U calaamadee aagagga inay yihiin " privite gaar ah" si saraakiisha socdaalka aysan u geli karin fasax la'aan ama amar maxkamad la'aan.
- Haddii aad heshay warqadda "No-Match" ee ka timid Social Security Administration, diiwaan geli sida aad isku deyeyso inaad u hagaajiso.

## Haddii ICE ama Saraakiisha Socdaalka ee kale ay yimaadaan

- Isdeji. Isku day inaad xasuusato magacyada oo u fiirso waxa dhacaya.
- Oggolow gelitaanka meelaha dadweynaha. Qof kasta, oo ay ku jiraan wakiilada ICE, waxay geli karaan goobaha guud ee ganacsigaaga fasax la'aan. Goobaha dadweynaha waxaa ka mid noqon kara hoolka, goobta soo dhaweynta, xafiiska hore, goobta baabuurta la dhigto, iyo meelaha ay dadweynuhu heli karaan.

AFEEF: Dukumentigaan waxa daabacay Davis Wright Tremaine LLP, DWT -com, si loola socodsiiyo macaamiisheenna iyo asxaabta isbeddelladii sharciyeed ee ugu dambeeyay. Ma ahan talo qareen. Dukumeentigan waxaa turjumay Magaalada Seattle; si kastaba ha ahaatee, waxa ku jira Magaaladu ma aysan sameyn. Macluumaadku wuxu ka yimid shirkadda qareenka ee Davis Wright Tremaine LLP.

Davis Wright Tremaine LLP Immigration Group
dianebutler@dwt.com | 206-757-8354 | meganvogel@dwt.com | 206-757-8258

Weydii wakiilada aqoonsi, foon lambar laga waco ka dib, iyo ogeysiisyo sharaxaya sababta ay u yimaadeen.
La xidhiidh Waaxda Shaqaalaha, maamule, qareenka shirkadda, ama xidhiidhka la magacaabay.

## Noocyada Warqadaha

- **Ogeysiiska kormeerka** - tani waa codsi ka yimid ICE ama Amniga Gudaha si aad ula wadaagto Foomka I-9, 3 maalmood oo shaqo gudaheed. La xidhiidh qareen ka hor intaadan ka jawaabin.
- **Amarka-maxkamadeed ee sharci-fulinta socdaalka** - tani badanaa waxay codsataa dukumeentiyo kale oo ay la socdaan Foomka I-9.
- Xarigga maxkamadeed ama waaran baaritaan - waarankan waxaa saxiixay garsoore ama garsoore maxkamad federaal ah. Waxa laga yaabaa inay u ogolaato wakiilada ICE inay galaan meelaha gaarka ah ama ay qaataan dukumentiyada. Akhri warqadda waaranka. Hubi in ay sharci tahay hana ogolaan wax ka baxsan amarka.
- **Waaran maamuleed** -- tani badanaa waxaa ku qoran “Department of Homeland Security” ama “Immigration and Customs Enforcement” waxayna noqon doontaa Foomka I-200 ama Foomka I-205. La'aanteed waaran sharci ah oo garsoore saxiixay ama amar maxkamadeed, loo shaqeeyaha waa in uu dhahaa "ma ogolaan karo, mana oggoli." Haddii ICE ay ku tusto amar maamul oo uu ku qoran yahay magaca shaqaalaha:
  - **Ma ahan** in aad u sheegto in shaqaaluhu shaqaynayo maalintaas iyo in kale.
  - **Looma baahna** inaad u gayso wakiilada ICE shaqaalaha lagu magacaabay warqadda waaranka.
- **Rasiidka alaabta ay ICE qaadato** - Haddii diiwaannada la qaato, ICE waa in ay siiso shirkada rasiid si ay ula socoto waxa ay qaadanayaan.

## Wada-xiriirka shaqaalaha inta lagu jiro booqashada

- Xusuusi shaqaalaha inay is dejiyaan oo **aysan** cararin. Wakiilada ICE ayaa laga yaabaa inay eryadaan dadka carara waxaana laga yaabaa inay xidhaan dadka ay uga shakiyaan inay ku xad gudbeen sharciyada socdaalka.
- Waad duubi kartaa wakiilada ICE ilaa inta aadan faragelin waxa loo ogolyahay inay sameeyaan.
- Waaran maxkamadeed hadii ay wataan, ICE waxa ay la wareegi kartaa telefoonada, laptop-yada, iwm, ama waxa laga yaabaa in ay sawir ka qaadaan ama ay sawiraan macluumaadka iyaga oo aan qalab qaadan.
- **Ha** siin ogolaanshaha ICE inay joojiso, su'aasho, ama xidho qof, aadaan meel kasta oo ay rabaan ama qaataan waxay doonaan.
- **Ha** ku caawin wakiilada ICE adoo la wadaagaya xaalada sharci-haysashada dadka ama dalka ay ka yimaadeen wakiilada.
- Dhammaan shaqaaluhu waxay xaq u leeyihiin inay iska aamusaan oo ay weydiistaan qareen. Shaqaalaha loogama baahna inay ku wareejiyaan wax aqoonsi ama waraaqo ah ICE.
- Macluumaad kasta oo ay shaqaaluhu siiyaan ICE waxa loo isticmaali karaa iyaga hadhow.
- Qof kasta oo la xidho waa inuu codsadaa looyar iyo "dhegeysi muujin sabab".

AFEEF: Dukumentigaan waxa daabacay Davis Wright Tremaine LLP, DWT -com, si loola socodsiiyo macaamiisheenna iyo asxaabta isbeddelladii sharciyeed ee ugu dambeeyay. Ma ahan talo qareen. Dukumeentigan waxaa turjumay Magaalada Seattle; si kastaba ha ahaatee, waxa ku jira Magaaladu ma aysan sameyn. Macluumaadku wuxu ka yimid shirkadda qareenka ee Davis Wright Tremaine LLP.

Davis Wright Tremaine LLP Immigration Group
dianebutler@dwt.com | 206-757-8354 | meganvogel@dwt.com | 206-757-8258

## Isla markiiba Booqashada ka dib

- Qor ama duub waxyaabahan ka dib saraakiishu baxdo:
  - Imisa wakiil ayaa joogay (gudaha ama dibadda)? Maxay ahaayeen magacyadoodu?
  - Sidee wakiilladu u labisnaayeen? Sidey u hubeysnaayeen?
  - Adiga ama Shaqaalahaagu miyaad aaminsanaydeen inaadan dhaqaaqi karin ama aanad bixi karin markay yimaadeen wakiiladu?
  - Wakiiladu cid ma u hanjabeen ama si xun ma ula dhaqmeen? Hadday haa tahay, sidee?
- Haddii ICE ay qof xirto, weydii wakiilada ICE meesha ay dadka geynayaan.
- Haddii uu jiro baaritaanka Form I-9, diyaari dukumentiyada. Waxaad codsan kartaa in ka badan 3 maalmood si aad u dhiibto diiwaannada.

AFEEF: Dukumentigaan waxa daabacay Davis Wright Tremaine LLP, DWT -com, si loola socodsiiyo macaamiisheenna iyo asxaabta isbeddelladii sharciyeed ee ugu dambeeyay. Ma ahan talo qareen. Dukumeentigan waxaa turjumay Magaalada Seattle; si kastaba ha ahaatee, waxa ku jira Magaaladu ma aysan sameyn. Macluumaadku wuxu ka yimid shirkadda qareenka ee Davis Wright Tremaine LLP.

Davis Wright Tremaine LLP Immigration Group
dianebutler@dwt.com | 206-757-8354 | meganvogel@dwt.com | 206-757-8258